



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisa, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay:
<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Diisambar 3, 2020

Ku socota: Dhammaan Daneeyayaasha ODDS

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Guddiga Maaliyada ee Senate-ka Maraykanka oo sii daysay warbixin dhanka baaritaanka ah

Maanta, Guddiga Maaliyada ee Senate-ka Maraykanka ayaa sii daysay warbixin ku saabsan baaritaan lagu sameeyay daryeelka uu bixiyo MENTOR Oregon. Meelaha laga sii gelayo ee sheekada ku qoran wargeyska The Oregonian/oregonlive.com iyo warbixinta ayaa hoosta ku taala.

Tani waa fursad lagu xasuusinayo qof kasta in xadgudub iyo dayacaadi aysan ahayn in ay marnaba ku dhacdo qof, oo ay ku jiraan kuwa ku tiirsan nidaamka gobolka ee taageera dadka qaba naafanimada maskaxda ama korriinka. Daryeel bixiyiyaashu waxay door muhiim ah ka cayaaraan taageerida dadka qaba I/DD, oo ay ku jiraan ilaalinta caafimaadkooda iyo badbaadadooda, iyo baahida loo qabo la feejignaado waqtiyada oo dhan si loo xaqiijiyo in uusan xadgudub dhicin. Anaga ODDS ahaan waxaanu sii wadi doonaa in aanu la xisaabtano daryeel bixiyayaasha haddii aysan buuxin shuruudahaasi looga baahan yahay.

Nidaamka Oregon ee taageeraya dadka qaba naafanimada maskaxda ama korriinka (I/DD) waxaa lagu dhisay iskaashi muhiim ah. Inaga oo wadajirna, gobolka, dowladaha degaanka, hay'adaha aan faa'iido doonka ahayn, hay'adaha daryeelka bixiya, dadka u dooda naftooda iyo qoysaska ayaa dadka qaba I/DD ka caawiya in ay si guul leh ugu dhex noolaadaan bulshooyinkooda. Waa inaanu dhammaanteen qabanaa qaybteena si dadka loo dhigo kuwo caafimaad iyo badbaado ku sugaran.

Haddii aad ka shakisan tahay xadgudub la geystay, soo sheeg:

- Dadka waaweyn ee qaba naafanimada maskaxda ama korriinku waxay xadgudubka, dacayaada ama ka faa'iidaysiga dhaqaale ee la tuhun san tahay u soo sheegaan [Barnaamijka Naafanimada Korriinka Bulshada ee degaanka](#).
- Xadgudubka iyo dacayaada la tuhunsan yahay ee loo geysto I/DD waxaa wax looga qabtaa si la mid ah ta carruurta kale oo dhan. U soo sheeg DHS Child Welfare adiga oo kala xiriiraya 1-855-503-SAFE (7233).

Sheekada wargeyska The Oregonian: [Shirkada naafanimada korriinka ee Oregon oo isdaba joog ah guuldaroo ugu keentay dadka reer Oregon ee nugul, baaritaanka Senate-ka Maraykanka waxaa lagu ogaaday](#)

Warbixinta: [Nolosha ka jirta Cypress House: Baaritaan la xiriira Daryeelka Uu bixiyo MENTOR Oregon](#)

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa
[http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-
DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx](http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx)

*Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo
wax ka ogow website-keena.*

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.